Oregon Health Authority

QEYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Wajiga Koowaad ee Hagida Dib ufurida FAQs

Howlwadeenada Xarumaha Madadaalada ee Gudaha iyo Bannaanka

*(La cusbooneysiiyay **8-4-2020**)*

Dulmarka

Hoos waa jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) ee ku saabsan Jaheynta Dib u furida Wajiba Labaad ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA): Howlwadeenada Xarumaha Gudaha iyo Banaanka (jaheynta loogu tallogalay Xarunaga Madadaalada Gudaha iyo Banaanka). OHA waxay bixisaa oo waxay si aan joogta aheyn u cusbooneysiin kartaa FAQ gaan si ay ugu caawiso in bulshada fahamto jaheynta, ka jawaabaan su'aalaha daneeyayaasha, oo xaqiiji sida jaheynta u quseyn karto xaaladaha gaarka ah. FAQ ga looguma tallogelin inuu qaato booska jaheynta laakin ku caawiyo inuu fasiro, dheeraadka, oo ku caawiyo buuxinta sharaxaadaha jaheynta. Hagida loogu talagalay Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Bannaanka iyo FAQs waxay khuseeyaan kaliya degmada loo ansixiyay Dib-u-furida Wajiga Labaad.

S1: Miyaa naqshadaha iyo leesarka laga ogolaanayaa Wajiga 2?

J1: Haa. Tixraac jaheynta Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Banaanka oo nidaamyada howlgelida iyo nadiifinta oo howlahaan. Caadi ahaan, howlaha la ogolyahay waxay ku qoranyihiin Aalada Jaheynta Dib u furida.

S2: Miyaa guryaha cambiirada iyo jiimamka ciyaarta gudaha laga ogolyahay inuu ka howlgalo Wajiga 2?

J2: Maya. Noocyadaan xarumaha madadaalada lagama ogolo inay shaqeeyaan waqtigaan. Caadi ahaan, howlaha la ogolyahay waxay ku qoranyihiin Aalada Jaheynta Dib u furida.

S3: Waa maxay sharuudaha nadiifinta masrax inta u dhaxeyso bandhigyada?

J3: Howlwadeenada masraxa waa inay nadiifiyaan oo jeermisdilaan aagaga dadka badan iyo sagxadaha aadka loo taabto ee masraxa — oo ay ku jiraan kuraasta iyo miisaska — inta u dhaxeyso bandhigyada. Howlwadeenada masraxa waa inay sidoo kalesi buuxda u nadiifiyaan xarumaha musqulaha ugu yaraan labo jeer maalin walba iyo, ilaa iyo xad sida suurtogalka ah, hubiyaan saadka nadaafada ku filan (saabuun, warqada musqusha, jeermis dillaha gacanta) bilow ilaa dhammaad maalinta. Isticmaal jeermisdilayaasha lagu daray Wakaalada Illaalada Deegaanka (EPA) liiska la ansixiyay oo fayraska SARS-CoV-2 ee sababo COVID-19. Ma jiraan badeeco lagu qorayo COVID-19 weli, laakin badeecooyin badan waxay yeelanayaan qoraal ama warbixin laga heli karo websaydyada oo ku saabsan wax ku oolkooda ee fayraska corona ee aadanaha.

S4: Waa maxay sharuudaha lagu maareynayo dalxiiska oo baska dalxiiska?

J4: Hawlwadeenada dalxiiska waa inay raacaan Hagida Gaarka u ah Hay'adaha Gaadiidka iyo Hagida Wajiga 2 ee loogu talagalay Xarumaha Madadaalada ee Gudaha iyo Banaanka ah. Ugu yaraan sadxe (3) fiit waa in laga joogteeyaa sida waafaqsan inta u dhaxeyso rikaabka. Lix (6) fiit waa in la joogteeyaa oo u dhaxeysa darawalka iyo rikaabka, marka laga reebo inta lagu jiro sii socodka iyo markii aad caawineysid kuwa leh aaladaha dhaqaaqa. Ka qeybqaatayaasha dalxiiska oo isla kooxda ah waxay fariisan karaan wax ka yar sadex (3) fiit oo qeyb ah. Howlwadeenada dalxiiska waa inay nadiifiyaan baska afar saacadood ee walba iyo inta u dhaxeyso kooxyada dalxiiska, oo ay la jirto xoog saarida sagxadaha aadka loo taabtay. Darawalada iyo dadka fuula gaariga waa inay xirtaan waji daboolashada sida waafaqsan hagista Maaskaraha Gobolka oo dhan, Daboolka Wajiga iyo Waji Daboolaha. Howlwadeenada dalxiiska waa inay xadeeyaan safarka aan muhiimka aheyn sida waafaqsan Amarada Fullinta Dowlada.

S5: Miyaa la ogolyahay bandhigyada fardaha ee banaanka ah inta lagu jiro Wajiga 2?

J5: Haa. Howlwadeenada dhacdooyinkaan waa inay raacaan Jaheynta Dib u furida Wajiga 2 – Howlwadeenada Goobta iyo Dhacdada. Hawlwadeenada waa inay ku xaddidaan isu imaanshaha ugu badnaan 100 qof oo gudaha ama 250 qof oo bannaanka ah, waa inaysan kor u dhaafin 250 oo gudaha iyo bannaanka ah; ama tirada dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha, sida ku saleysan go'aaminta mugga (cabbirka baaxada aaga/daganaanshaha), tiro walba oo yar, oo u hoggaansan Hagista OHA ee Isu imaanshaha.

S6: Miyaa darjiimada madadaalada loo ogolyahay in la furo Wajiga 2? Waa maxay jaheynada nadiifinta darjiinka madadaalada?

J6: Haa, haddii ay u hogaansanyahay Jaheynta Wajiga 2 oo Xarumaha Madadaalada Gudaha iyo Banaanka. Howlwadeenada darjiinka waa inay ku xadeeyaan tirada isu imaanshaha ugu badnaan 100 qof gudaha dhismaha ama 250 qof bannaanka dhismaha, waa inaysan kor u dhaafin 250 gudaha iyo bannaanka dhismaha; ama tirada dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha, sida ku saleysan go'aaminta mugga (cabbirka baaxada aaga/daganaanshaha), tiro walba oo yar. Illaa iyo xad sida suurtogalka ah, howlwadeenada waxaa lagu dhiirogelinayaa inay u xilsaaraan salaame u xilsaaran ama marigeliye maareeya qulqulka martida oo kormeero ka fogaanshaha jir ahaanta iyada oo martida ay ku sugayaan leenka oo galayo ama ka tagayo goobta. Tixraac hagista Xarumaha Madadaalada ee Gudaha iyo Banaankaee loogu talagalay Wajiga 2 oo shuruudaha gaarka u ah nadiifinta.

S7: Waa booska bandhiga naqshada/farshaxanka oo loo tixgeliyo matxaf ama booska tafaariiqda?

J7: Naqshadaha waa inay raacaan jaheynta iyo sharuudaha booska tafaariiqda. Naqshadaha martigeliyo dhacdooyinka waa inay hogaansamaan Jaheynta Howlwadeenada Goobaha iyo Dhacdada.

S8: Haddii masraxa filimaanta leeyahay dhismo badan, hoolal gooni ah, waa xadeynta tirada ugu badan (100 qof ama tiro kale oo ku saleysan go'aaminta mugga) hoolkiiba ama dhismaha oo dhan?

J8: Howlwadeenada masraxa waa inay raacaan Jaheynta Howlwadeenada Goobaha iyo Dhacdada. Howlwadeenada masraxa waa inay ku gooniyeeyaan dhammaan xarumaha iyo hawlaha ay martigelinayaan dhacdooyinka gudaha gooni ah ee isla waqtiga oo isku meel ah. Ka qeybgalayaasha/ka qeybqaatayaasha dhacdooyinka gudaha gooniga oo isku goobta waa inaysan wadaagin booska, oo ay ku jiraan musqulaha.

S9: **Baararka shiishadaha waa la xiray gundhig ahaan sida hoos timaada Wareegtada Gubanatooraha 20-27. Goorma ayaa la oggol yahay in dib loo furo?**

J9: Wakhtigan, baararka shiishada looma oggola inay ka shaqeeyaan gobolka, oo ay ku jiraan degmooyinka bilow ahaan, ku jira Wajiga 1 ama Wajiga 2.

S10: **Doomaha jet-ka ma loo oggol yahay inay shaqeeyaan inta lagu jiro gundhigga, Wajiga 1 ama Wajiga 2?**

J10: Haa, doomaha jet-ka ah waa loo oggol yahay inay ka shaqeeyaan bilow ahaan, degmooyinka ku jira Wajiga 1 iyo Wajiga 2. Macaamiisha iyo shaqaalaha waa inay ilaaliyaan ugu yaraan lix (6) fiit oo masaafo jir ahaaneed ah inay isu jiraan marwalba oo ay u hoggaansamaan Hagista Maaskaraha Gobolka oo dhan, Daboolka Wajiga, Waji Daboolaha . Degmooyinka Wajiga 2 ku jira, hawlwadeenada doomaha jet-ka ah waxay isticmaali karaan xadeynta jirka sida dhalada difaaca, si uu u beddelo lixda (6) fiit ee masaafada jirka loo baahan yahay. Xadeynta waa inay ahaataa mid aan biyo gudbeyn, fudud in la nadiifiyo, iyo ugu yaraan hal (1) fiit ka dheer heerka madaxa oo macaamiisha fadhido iyo ugu yaraan sadex (3) fiit balaaran ama ugu yaraan balaca fadhiga haddii ka dheeryahay sadex (3) fiit. Dhalada difaaca (dharka) ama waxyaalaha kale ee xadeynada jirka ma beddelayaan ama ma badali karaan u hoggaansanaanta shuruudaha gashashada maaskarada, daboolada wejiga, waji daboolaha sida lagu sheegay Hagista Maaskaraha Gobolka oo dhan, Daboolka Wajiga, Waji Daboolashada .

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa macluumaad qaabab kale sida turjumaad, daabacaad/far waa weyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.